

Khayraadka daryeelka caafimaadka Somaliland: Heer Caalami ilaa kan Bulshada

Daryeelka caafimaadka Somaliland waxa bixiya kuwo dawli ah, kuwo gaar loo leeyahay iyo kuwa dhaqanka. Adeega caafimaadka Somaliland waxa haysta caqabado badan, dawladduna ma damaanad qaadi karto inay siiso adeeg caafimaad oo ku filan shacabkeeda. Dawladdu sidoo kale ma awooddo ilaalinta adeegyada caafimaad ee ay bixiyaan kuwa gaarka loo leeyahay iyo kuwa samafalka ahiba. Sababta kali ah ee dhaliyay caqabadahani waa miisaaniyadda qaran ee loo heli karo goobaha caafimaadka ee dawladda oo kooban. Qayb libaax oo ka mid ah dhaqaaalaha ku baxa daryeelka caafimaadka waxa ku deeqa deeqbixiyaal caalami ah iyo qaar maxalli ah, halka ay ka jireen Somaliland gudaheedana dedaalo lagu dhiirrigalinayo ka qayb galka bulshada iyada oo loo marayo hindisiyaal kharash-wadaag. Dedaaladin si baaxad leh ayay u guul daraysteen, hasayeeshee meelaha guulaha laga gaadhay waxa ay damaanad qaadeen in la helo ilodhaqaale oo joogta ah waxana ay yareeyeen ku tiirsanaantii ilaha deeqaha dibada oo la wata mudnaano ama ahmiyado daryeel caafimaad oo dibadeed.

Qodobbo Kooaban

- Taageerada deeq bixiyeyaasha ceelimigu ka gaystaan daryeelka caafimaad Somaliland waxa uu dhaliyaa caqabado xagga islaxisaabtanka ah maadaama teegeerada deeqbixiyuhu ay tahay ku-meelgaadh kuna tiirsan tahay cilmi baadhista iyo meelaha ay danaynayaan daneeyaasha dibaddu.
- Cilmi baadhis lagu samaayey isla xisaabtanka adeegayada caafimaadku waxa ay muujinaynsaa sin dedaalada kharash-wadaagga ee bulshada Somaliland (deegaanka iyo kuwa dunida deefaheeda) ay wax ka qaban karto caqabada haysta joogtaynta adeegyada.
- Haddaba dedaalada kharash –wadaagga ee hadda jira kuma lammaana lahaansho bulsho iyo isla xisaabtan midna.
- Balaadhinta ka qaybgalka bulshada iyada oo loo marayo ka qaybqaadashada bukaanka ayaa ah hab kor loogu qaadi karo isla xisaabtanka nidaamka caafimaadka.

Cindy Horst

Peace Research Institute Oslo (PRIO)

Nasra Jama

Nidaamka Caafimaad ee Somaliland: Taariikhda/sooyaalka iyo Xaqiiqooyinka Hadda Jira

Taariikhda Somaliland, dhanka daryeelka caafimaadku wuxuu ahaa mid ilaa xad gaabis ah islamarkaana aan heli jirin maalgalin ku filan. Wixii ka horeeyay 1970aadkii qayb ka mid ah kaabayaasha Somaliland, gaar ahaanna kuwa ku yaalla caasimaddu waxa ay u muuqdeen kuwo wanaagsan. Ka dib madaxbanaanidii laga qaatay Ingiriiska iyo la midawgii koonfurta Soomaaliya, maaraynta hay'adaha dawliga ah kuwaas oo uu ka mid yahay caafimaadku waxa ku yimi hoos u dhac xagga woqooyiga Soomaaliya. Maamulkii dhexe lama dhicin dadaaladdii looga gol lahaa in kor loogu qaado xaaladaha jiray. Xilligii Dagaalkii Ogaadeeniya ee 1977/1978, hay'ado caalimi ahaan ayaa yimid Hargeysa kuwaas oo kaalimaynayay qoxootiga ka imanaya Itoobiya. Dhakhaatiirtii maxaliga ahaydna waxay ka loh-lohdeen kaalmo dhaqaale, si kor loogu qaado xaaladda ka jirta Cusbitaalka Guud ee Hargeysa (oo loo yaqaan Hargeysa Group Hospital, HGH).

Somaliland gudaheeda waxa kobcay qanaaco darroonii la xidhiidhay isku daygii ula kac ahaa ee maamulkii dalka ka talinayay ku liciifnayay tayada adeegyada la bixinayay, waxana dhacay iska caabin laba waji leh, sida in bulshadu ka hawlgasho sidii loo horumarin lahaa adeegga dadweynaha ee uu daryeelka caafimaadku ka mid yahay intaa ka dibna waxa bilaabmay mid siyaasad iyo ciidan leh waxaana 1981 kii Landhan ka aas-aasmay Dhaq-dhaqaaqa Waddaniga Soomaaliyeed (SNM). Cusbitaalka Guud ee Hargeysana (oo loo yaqaano Hargeisa Group Hospital) waxa uu ahaa xarun dhexe oo isku xidha hawlaha.

Waxa annu ahayn xirfadlayaal yar-yar oo da'dayda oo kale ah kana kala yimid Yurub, Waddamada Carabta iyo kuwo dalka joogayba. Waxa aan bilawnay in aan kor u qaadno fayodhawrka cusbitaalka, annagaana soo iibsaday agabkii nadiifinta. Waxa aan ku dhiirri galinnay dadka in aannay waxba ka sugin maamulka dalka haysta laakiin iyaga qudhoo wax qabsadaan. Wixii lagama maarmaan ahaa waxa aan ku soo iibsaday jiray deeqaha naga soo gaadha qurba joogtii ku noolayd Bariga Dhexe

Cabdi Mursal, Hargeysa

Dhawr ka mid ah dadkii ku luglaahay hawlaha ka socday HGH waa la qabtay xabsigaana la dhigay waxana halkaa lagu hayay muddo sannado ah. Dagaalkii ka bilaabmay Woqooyiga sannadihii 1980 naadkii iyo wixii ka dhashay ee 1990 naadkii ayaa xaaladdii sii cakaray. Shaqaale caafimaad baa ku dhintay ama ka qaxay waxana la baabi'iyay goobihii caafimaadka.

Cilmi-baadhistayada aan ka wadno ku dhaqanka isla-xisaabtanka ee nidaamka daryeelka caafimaad ee Somaliland, kaas oo gundhig looga dhigay afartan waraysi oo qoto dheer oo lala yeeshay haldoor xog-ogaal ah oo kala jooga lixda gobal, waxa ay si gaar ah diiradda u saaraysaa xaqiiqooyinka dhabta ah iyo caqabadaha manta jira. Nidaamka caafimaadka bulshada ee hadda ka jira Somaliland wuxuu ka koobanyahay qaybo daryeelka caafimaadka aasaasiga, xarumo caafimaad, xarumo loo gudbiyo xaaladaha caafimaad ee daran, iyo cusbitaalo heer gobol ah. Xogta laga hayo tirada goobaha caafimaadka bulshada ee sida dhabta ah u shaqaysaa way yartahay laakiin sida ay tibaaxday Wasaaradda Caafimaadku waxa jira ugu yaraan 7 cusbitaal oo heer qaran ah iyo 97 xarumo caafimaad. Kala duwanaansha gobaladu ee baahiyaha daryeelka caafimaadku aad buu u weyntahay, qaybaha fog ee wadanku, goobaha daryeelka caafimaad ee ugu dhaw waxa ay jiraan fogaan saacado ah. Waxa iyaduna jirta weliba in xarumaha caafimaadka ee waaweyn ee ku yaalla tusaale ahaan gobolada Sool iyo Sanaag ee xagga Woqooyi-bari, ay aad u liitaan adeeg ahaan.

Isbadallada waaweyn ee dhacay dagaalkii sokeeye ka dib waxa ka mid ah in ay aad u bateen qaybaha caafimaad ee gaarka loo leeyahay. Iyada oo xogla'aantu ka dhigaysa mid aan suuro-gal ahayn in la tiriyay, qaybaha caafimaad ee gaarka loo leeyahay ayaa ah ta kaliya ee sida badan ay bukaanku ku xidhanyihiin. Qaybtani malaha wax xakameeya si baaxadlana waa loo adeegsadaa. Caqabadaha ay tani keeni karto waxa tusaale u ah, warbixin cusub oo laga qoray qaybtan ayaa sharaxaysa in ay hadda jiraan ugu yaraan 1000 farmasiis oo shaqeeya guud ahaan Somaliland bixiyana daawayn, inkasta oo aanu jirin mid ka mid ha farmasiyadan oo ay hay'ad dawladeed si dhab ah u xakamayso.

Somaliland waxa ka jirta baahi aad u saraysa oo loo baahanyahay mihnadlayaal caafimaad oo aqoonle shaqaale yariduna waa dhib haysata guud ahaan qaybta caafimaadka bulshada. Arintanina gaar ahaan waa ta ka jirta meelaha ka baxsan Hargeysa iyo dhawr magaalooyinka kale ee waay-wayn ka mid ah. In badan oo ka mid ah mihnadlayaasha caafimaadku waxa ay ka shaqeeyaan qaybaha ay dawladdu leedahay iyo kuwa gaarka loo leeyahay labadaba, arinkan oo joogitaanka shaqaalaha ee xarumaha caafimaadka dawladdu leedahay war-war weyn ku abuurtay. Sannadii 2013, waxa la aas-aasay Guddida Qaran ee Mihnadlayaasha Caafimaadka oo u xil-saaran xakamaynta adeeg-bixiyayaasha caafimaad ee dawladdu leedahay iyo kuwa gaarka loo leeyahayba, laakiin shaqadoodu aad bay u yartahay ilaa imika.

Taageerada Caalimiga ah ee daryeelka caafimaadka

Waxaa jira deeqbixiyeyaal iyo ururo caalimi ah oo kaladuwan oo taageero siiya daryeelka caafimaadka Somaliland oo ay kamid yihiin UNICEF, WHO, Sanduuqa Horrumarinta Somaliland (SDF), MSF

iyo qaar kale. Nooca teegerada labixiyaa waxa ay kala tahay kuwo agab caafimaad iyo taageerada xirfadlayaal caafimaad si loo hawl galiyo goobaha caafimaadka. Agabka la siiyo cusbitalada iyo xarumaha caafimaadka waxa ka mid ah daawo iyo cunto. Dedaalada lagu horrumarinayo helitaanka xirfadlayaal caafimaad oo aqoon leh waxa kamid ah in tababaro lasiiyo lana aasaaso barnaamijyo tababar caafimaad ee Somaliland. Intaas waxa siidheer, kuwo kamida ururadu waxa ay soo diraan shaqaale aqoon leh oo aan laga helayn Somaliland, sida dhakhaatiirta qaliinka indhaha. Marka laga reebo shaqaalaynta dhakhaatiirtan shisheeye iyo mishahaar siintooda, mararka qaar ayaa teegerada caalimiga ah mishahaaradka loogu kordhiyaa shaqaalaha maxaliga ah si loogu abuuray dhiirgalin wayn oo ay ku joogi karaan xarumaha caafimaadka ee gobolka ee ay baahidu ugu badan taallo. Ugu danbayntii, taageero caalimiya ayaa loo fidinayay si loo dhiso goobo caafimaad oo gaar ah iyo xitaa mararka qaar in la hawl galiyo cusbital ama dhawr xannaano (MCH) gobaleed.

Iyada oo taageerada caalimiga ah ee daryeelka caafimaadku ku biiriyo khayraad aad loogu baahnaa nidaamka daryeelka caafimaadka Somaliland, ayaa iyana waxa kale oo jirta siyaabo lagu keenayo dad shisheeye oo loo arkikaro qaali, sida uu Dr. Idiris Cilmi oo ka tirsan Cusbitalka Guud ee Hargeysa uu naxasuusiyey markii aan falanqaynaynay sida kabka dawladdu siiso cusbitalka loo isticmaalo:

Qayb wayn oo ka mida taageerada dhaqaale ee dawladdu bixiso waxaa lagu kharash gareeyaa mushaharaadka dhakhaatiir shisheeye. Waxaa jooga cusbitaalka ku dhawaad 10 shisheeye oo takhasusle midkastana waxaa lasiiyaa \$2000 bishii. Kadib marka shaqaalaha mushaharaad kooda lasiiyo waxba kama hadhaan Ikii malyan.

Dr. Idiris Cilmi, HGH, Hargeysa

Mushkiladdan si fudud looma waajihi karo marka arrintu la xidhiidho [xirfadlayaal] takhasusad iyo aqoon sare leh taasna waxaba ka sii daran in shaqaalaha hoose ee caafimaadka oo lagaheli karo Somali aqoon leh ay NGO-yadu doorbidaan in ay kiraystaan shaqaale ka yimidda dalalka dariska si ay u hirgaliyaan mashaariicda. Waxa raaca intaas, taageerada caalamiga ahi waxa ay sii waynaysaa farqiga u dhaxeeya gobalada maadaama walaaca dhinaca amniga ee Sool iyo Sanaag uu ka horjoogsado shaqaalaha mashaariicda caafimaadka iyo ee caalamiga ah in ay gali karaan gobaladan.

Waxa kale oo jira labo mushkiladood/jahawareer oo haysta taageerada caalimiga ah ee daryeelka caafimaadka. Tan hore waxa ay laxidhiidhaa lahaanshaha iyo talabaad oo ah joogtaynta [adeegyada]. Xaga lahaanshaha, ku tiirsanaanta deeqaha shisheeye

micnaheedu waa in aanay badanaa suuragal ahayn in aad go'aan sato khayraadka la isticmaalayo. INGO-yau waxa ay layimaadaan mashaariic dhamaystiran oo ay ugu talo galeen meelaha ay aadka u danaynaayan ama ay ka arkaan baahiyaha waa wayn. Tani lama jaanqaadi karto fahanka maxaliga ah ee baahiyaha, sida ay tibaaxeen dawladda iyo bixiyayaasha adeegga caafimaad ee gobaladu.

Dadka goballadu badanaa way ku jahawareeraan maxaa yeelay inta badan waxa ay arkaan baahi lagu daray qorshaha istratijiyadeed ee dawladda. Adiga oo haysta qorshahaaga gaarka ah, ayaa ay kuula imanayaan kuwo aan muhiim ahayn si ay kuwaagii ugu badalaan. Markaa doorasho malihid laakiin waa inaad raacdo tooda sababtoo ah miskiin ayaa tahay. [...]

**Dr. Ibrahim Cabdifataax,
Cusbitalka Guud ee Borama**

Waji kale ee lahaanshuhu leedahay ayaa la xidhiidhaa islaxisaabtanka. Kaliya ma aha in aanay suuragal ahayn in la go'aansado kala horraaysiinta mashaariicda laakiin waxa kale oo aad u adag isla-xisaabtanka kor u socodka ah iyo tan hoos u socodka ahba ee nidaamkan. Caqabadda ugu wayni waa lacagta deeq bixiyaha oo aan loo maamulin si laba geesood ah, oo aan la soo dhexmarinna dawladda. Xaaladdan waxa sababay maqnaanshaha Nidaamka Maamulka Maalliyadda Dadwaynaha iyo walwalka laga qabo musuqmaasuq. Haddii ay dawladdu leedahay nidaam xisaabeed iyo maamul oo daahfuran, deeqbixiyayaashu wax aay awoodi lahaayeen in ay si toos ah qasnadda wasaaradda maalliyadda ugu shubaan oo barnaamijyadu noqdaan kuwo dawladdu waddo. Aamina Axmed oo ka hawlgasha wasaaradda caafimaadku waxa ay sharaxaysaa cawaaqibka xaaladda hadda:

Waqtigan xaadirka ah, qaadhaanka waxa lasoo dhexmariyaa ururro; ha ahaadeen UN, ururro maxali ama caalami ah. Ururradani waxa ay ka gooyaan kharashaadka maamulka lacagaha loogu talo galo fulinta mashruuca. Dawladdu kuma lug laha sababt oo ah ma maamusho miisaaniyadda[...] marka la eego nidaamkan ma jiro isla xisaabtan.

Aamin Axmed, WC, Hargeysa

Ururada hirgalinaya mashaariicdani waxa ay leeyihiin nidaam islaxisaabtan adag kuna waajahan deeq bixiyayaashooda shisheeye, laakiin aan ku waajahnayn

daneeyayaasha maxaliga ah. Xogta ku saabsan qandaraaska iyo shuruudaha shaqadu midkoodna lama wadaago, taas oo xitaa kadhigta mid aan suuro gal ahayn in ay daneeyayaasha maxaliga ahi la xisaabtamaan deeqbixiyayaasha caalimiga ah iyo NGOyada. Gudaha Somaliland waxa jira qanaaco darro baahsan oo la xidhiidha isku soo noq-noqoshada ka jirta mashaariicda shisheeyaha kuwaas oon intabadan ka jawaabin galdaloolooyinka muhiimka ah ee la tabayo deegaan ahaan. Waxa kaloo jira su'aalo tiro badan oo la iska waydiyo maal-gelin intee leeg baa lagu kharash-gareeyaa, lacag intee leeg baana ugu dambayntii soo gaadha Somaliland. Iyo marka ururada caalimiga ahi go'aan sadaan inay kulugyeeshaan taageerida daryeelka caafimaadka iyaga oo aan wargalin, tusaale ahaan xulashada shaqaale caafimaad oo ka qayb galaya tababar iyada oo aan lawargalin kormeerayaashooda, khatarta jirtaa waa in taageeridu xaqiigdi wiiqdo nidaamka maxaliga ah ee jira.

Mushkilad labaad ayaa laxidhiidhaa joogtayn la'aanta taageerada caalimiga ah. Muddadii ay socotay cilmi baadhista ay waxa aan ogaannay mashaariic badan oo ay ururrada caalimiga ahi iska saareen masuuliyaad gaar ah oo xidhmay kadib markii ay taageeridadoo joojiyeen. Sheekooyin kani hanaan isku mid ah ayey raaceen, marka NGO yimaado magaalada uuna go'aansado in uu taageero cusbitalka dawladda aanu kadhigo mid sifiican u shaqeeya. Waqtiyay kabadci tayada caafimaadku cirka ayey isku shareertaa marka ay xirfadlayaashu shaqada ka bilaabaan cusbitalka.

Kadib marka NGO-gu tago, waxkastaa wuu dumaa cusbitalkuna waxa uu dib ugu noqdaa xaaladdisii hore ama mid ka xun. Joogtayntu ma aha yoolka mashruuca xirfadlayaashuna way tagaan isla marka NGO-gu tago.

**Mahdi Cabdiraxmaan,
Maamulaha mashaariicda ee NGO
maxalli ah, Ceerigaabo**

Walaaca wayn ee hadda taagan marka la eego arrnta ayaa ah dedaalka Adeegyada Aasaasiga ah ee Caafimaadka Dadwaynaha (AACD). Ugu horayn, ururo kale ayaa faraha kala baxay bixinta adeegyada caafimaad ee aasaasiga ah iyada oo lafilayo inuu AACD bilaabmo. Tusaale ahaan UNICEF waxa ay joojisay inay siiso taageero Laascaanood tusaale ahaan, sababta oo ah AACD oo la filayay in uu bilaabmo. Maadaama uusan bilaamin waxaa dhacay daawo yaraan. Talabaad, taageeridda AACD waxa la filayaa in ay dhamaato waxaana jira su'aalo la xidhiidha joogtaynta dedaalkan. Xataa marka uu rurur caalami ahi leeyahay nadaam joogtayn oo sarreeya, majiro damaanad qaad ah in aanu nidaamku dumayn muddo gaaban gudaheed. Hodan Axmed waxa ay ugu shaqaysaa cusbitalka Ceerigaabo kalkaaliso ahaan. Waxay ku dooday:

MSF waxay cusbitalka ka tagtay isaga oo shaqaynta. Waadhadhka waxaa yaalay agabkii loo baahnaa oo dhan. Daawo sanadka oodhan ah ayaa lakeenay cusbitalka. Lixbilood gudeeheed kadib tagitaan koodii nidaamkii wanaag sanaa ee ay dhiseen waa dumay sababta oo ah karti la'aanta qofkii loo xil saaray awgeed.

**Hodan Axmed,
kalkaaliso caafimaad, Ceerigaabo**

Mid kamid ah caqabadaha ugu waa waayn ee joogtaynta hor taagan ayaa laxidhiidhaa xaqiiqada ah in ururrada caalimiga ahi intadaban bixiyaan adeegyo iyo agab bilaash ah, xitaa meelihii ay dadku iska bixin jireen. Marka ay taageerida caalimiga ahi joogsato, dadka oo dhan waxa ay wali fishaan in loogu adeego bilaash waxayna uqaataan in xirfadlayaasha caafimaadka ee degaanku qaadanayaan lacagtooda haddii lawaydiyo inay lacag bixiyaan. Iyada oo taageerada caalimiga ahi ay xuddun u tahay ka shaqaysiinta nidaamka caafimaadka ee soomaaliland maadaama dakhliga dawladdu yahay mid aan ku fillayn, waxa hadana muhiim ah in aanay taageerada caalimiga ahi hoos u dhigin ama meesha ka saarin khayraadka degaanka.

Tijaabooyinka kharash- waadaagga ee Soomaaliland

Ka qaybgalka bulshada ee la xidhiidha fududaynta bixinta daryeelka caafimaadka ee laga maarmaanka ah ayaa soo bilaabantay sanadihii 1970aadkii iyo 1980aadkii xilli bulshada, oo ay ku jiraan ganacstada gudaha iyo qurbajoogtu wax ku biiriyeen si xirfadlayaasha caafimaadka loogu fudaydiyo in ay bixiyaan adeegyadii dawladda qaran loo arkaayey in ay ka duusiiyay dadkii waqooyiga. Illa hadda ganacsatada iyo qurbajoogtu waxa ay wali kaalin ka qaataan taageeradan.

Muddadii uu xilka hayey Madaxwayne Maxamed Cigal, Wasaaradda Caafimaadku waxa ay unugtay Siyaasadda Caafimaadka Qaranka si wax looga qabto tamar yarida dawlada ee ah inay adeegga daryeelka caafimaadka siiso shacabkeeda sababta oo ah khayraadkeeda oo aad u koobnaa. Siyaasadani waxay wadatay nidaam kharash-wadaag waxa ayna sidoo kale soo jeedisay yagleelidda guddi bulsho oo ka warhaya cusbitaal goboleedyada. Iyada oo intabadan loo sameeyay in wax laga qabto kufilaan la'aanta kharashaadka, Siyaada Caafimaadka Qaranku waxa kale oo looga dan lahaa in ay dardar galiso wada-shaqaynta ka dhaxaysa dawladda iyo bulshada si loo helo dedaal lagu kordhiyo lahaanshaha bulshada ujeedaduna tahay in wax laga qabto heerka hooseeya ee isku hallaynaynta lagu qabo dawladda iyo dhawrid la'aanta baahsan ee hantida dadwaynaha.

Inkasta oo loo dan lahaa in Siyaasadda Qaran ee Caafimaadku ka hirgasho dhammaan gobolada kala duwan ee Somaliland, wakhti xaadirkan guddiga caafimaad ee heer gobol iyo nidaamka kharash-waadaaggu kaliya waxa uu ka shaqeeya Hargeysa, waxa aanu taageeraa Cusbitaalka Guud ee Hargeysa. Waxa jiray tiro qorshayaal ah oo la sameeyey oo ka dhigay nidaamka Hargeysa mid guulaysta. Guddidu waxa ay cusbitalka u fureen sanduuq dhigaal oo xubnaha guddida kaliya ay maamuli karaan oo aan loo ogolayn in uu koro sababta oo ah marka dhigaalku gaadho ilaa xad lacagta waxa lagu maalgalayaa agab caafimaad. Qofna nidaamkan dhaqaale ahaan uguna faa'iidaysto oo wax kasta waxa dib loogu maal galinayaa cusbitalka lacagtana waa laga war hayaa. Xubnaha guddida oo dhami waa mutadawiciin. Intaas waxa dheer, guddi gobolledka Hargeysa wuu ka madax banaan yahay wasaaradda halka bulshadu ay kaalin wayn kuleedahay samayntiisa walina kaalin laxaadle ayey kuleedahay taageerida hawlaha ugu muhiimsan. Guddidu waliba waxa ay sifican ugu xidhan yihiin cusbitalka mar haddiiba agaasimaha cusbitalku kamid yahay xubnaha guddida. Cusbitalku waxa uu kabaa maalgalinta dawladda iyo bulshada oo taageero caalimiya hesha, ha yeeshee deeq bixiyaayaashu waa in ay waxtarkooda dhex mariyaan maamulka cusbitalka.

Nimdaamka kharash-wadaagu waxa uu u shaqeeyo dhawr qaab. Guddi gobolledku waxa ay si firfircoon ugu lug leeyihiin siyaasadsamaynta iyo qaadhaan u ururinta cusbitalka. Xubanaha guddidu sidoo kale waxa ay taageero kadalbadaan qurbo joogta Somaliland. Tusaale ahaan, qurba joogta dalka Kuwayt waxa ay ku deeqeen makiinada ogsijiinta, halka qurbo joogta dalalka Iiran iyo Imaaraadku ku deeqeen makiinada kalyaha sifaysa. Haddaba, nidaamka kharash-wadaaggu waa meelmar sababta oo ah bukaanadu waxa ay iska bixiyaan tiro adeegyo ah kuwa awoodi karaana waxa ay iska bixiyaan inka badan. Farmasiga, haddii qiimaha daawadu yahay 14,000 ShSl, bukaanadu waxa ay bixiyaan 15,000 ShSl. Intabadan daawadda sidaas ayaa loo iibiyaa si loogu oggolaado kuwa aan awoodin in ay daawada ku helaan lacag la'aan. Bukaan jifka lagama qaado lacagta jifka ilaa ay adeegsadaan qolol ka gaarka ah mooyee. Lacagtaasi waxa ay sidoo kale gashaa nidaamka kharash-wadaaga. Nidaamyadan lacag ururineed ee dheeraadka ka ah khayraadka dawladdu bixiso tusaale

ahaan waxa uu suura galiyey in shaqooyin la siiyo xirfadlayaasha caafimaadka ee aan qaadani mishaharka dawladda. Lacagtu waxa ay sidoo kale suuro galisay korodhsiimada mushaharka iyo taageerida farmasiga.

Nidaamka kharash-wadaaggu ugu danbayntii waxa uu hal tallaabo u jiraa ciyimiska caafimaadka dadwaynaha mana noqon karo in bukaanno badan lacagta laga daayo. Sidaa awgeed, waxa uu ku salaysan yahay fikirka ah in bukaanada dhammaantood bixin karaan kharashka. Hadana, caqabadda ugu wayni ee nidaamku waa isaga oo aan fulin ujeedadiisii labaad, oo ahayd kor uqaadidda lahaanshiyaha bulshada. Nidaamkan sida Hargeysa looga hirgaliyey xaqiiqdii ma ogola isla-xisaabtan iyo in bulshadu si hagaagsan uga qayb gasho. Guddidu waxa ay u taagan yihiin inay talo bixiyaan iyo inay qaadhaan soo ururiyaan laakiin malaha awood ay ugu lugyeelan karaan maamulka goobaha caafimaadka ama la xisaabtanka wasaaradda caafimaadka. Kulug-lahaanshaha bulshada ee nidaamkani micnihiisu waa in hantida bulshadu ay galiso nidaamka qofkastaana heli karo adeegga aasaasiga ah ee daryaalka caafimaadka. Iyada oo ay guddidu ugu danbayta/haddii laga tagi waayo ay matasho bulshada, hadana ma aha hawshani mid horumarsan. Dadka qaar ayaa adeegga daryeelka caafimaadka ee ay helaan ugacawda guddida laakiin isla xidhiidhka guddida iyo bulshawayntu wuu liitaa bukaanno badanina war uma hayaan jiritaankiisa.

Gabogabo iyo Talo soojeedin

Inta lagu guda jiro iskudayga loogu raadinayo qaadhaan ku filan daryeelka caafimaadka Somaliland, lahaanshaha iyo joogtayntu waa qodobada xuddunta u ah ee ay tahay in daneeyayaashu ku xisaabtamaan. Maqnaashaha nidaamka maamulka maaliyadda dadwaynuhu wuxu caqabad ku yahay gargaarka laba geesoodka ah sidaasi awgeedna taageerada caalimiga ahi way ku liidataa lahaanshaha deegaanka iyo joogtaynta. Iyada oo la tixgalinayo xaqiiqadan, nidaamka-kharash wadaagga maxaliga ahi waa fursad kale oo muhiim oo ay tahay in lasahamiyo. Inkasta oo nadaam yadani kharash-wadaagga ah laga yaabo in ay jid dheer u soo mareen in waxa laga qabto khayraad yaraanta, hadana wali kumay guulaysan in ay hurumariyaan ka qayb qaadashada bulshada iyo lahaanshaha. Anaga oo kaduulayna cilmi baadhista, waxa aan ku

talnaynaa waxyaabaha soo socda:

- Dib u hawl-gelinta Guddi Gobolledka Caafimaadka iyo nidaamka kharash-wadaagga waa in la sahamiyaa, iyada oo laga shidaal qaadanaayo tusaalaha guulaystay ee cusbitalka Guud ee Hargeysa.
- Habkani waxa uu ubaahan yahay ku daridda ka qayb qaadashada bulshada si loo abuuro dareen lahaanshe bulsho oo intii hore ka badan oo la xidhiidha bixinta daryeelka caafimaadka. Guddi Gobolledka waa in lasiiyaa kaalin wayn oo ah xagga qaabka laxisaabtanka iyo damaanad qaadka xuquuqaha bukaanka.
- Hal qodob oo ay tahay in lagu daro Guddi Gobolledku ayaa ah soo kordhinta nadaam keenaya in ay bukaanku soo gudbin karaan walwalka iyo cabashooyink. Qodobkan waa in aad dadka loo gaadhsiya iyada oo la adeegsanayo habab cusbitalka gudhiisa ah iyo warbaahintaba. ■

Notes

1. Warbixin: Hay'adda Ilaalada Xuquuqda Aadanaha, www.hrw.org/report/2015/10/25/chained-prisoners/abuses-against-people-psychosocial-disabilities-somaliland.
2. Aqqalka Wakiilladda, 'Miisaaniyadda Dawladda', ma taariikhaysna, somalilandparliament.net/index.php/parliamentarybusiness/government-budget (Waxa la akhriyay August 19, 2015).
3. Aqqalka Wakiilladda, 'Miisaaniyadda Dawladda. Talagalka Miisaaniyad 231', ma taariikhaysna, somalilandparliament.net/index.php/parliamentary-business/government-budget; Siyaasadda caafimaadka ee dejisan Wasaaradda Caafimaadka waxa ka go'an in ay dawladda ku cadaadiso si ay kor u qaado 15% kharashka ay dawladdu ku bixiso dhinaca caafimaadka sida uu dhigayo heshiiskii Midawga Afrika ee Abuja, eeg 'Siyaasadda Caafimaadka ee Qaranka', p.39, faylka ay hayso Hay'adda Ilaalada Xuquuqda Aadanaha.

THE AUTHORS

Cindy Horst waa Agaasimaha Cilmibaadhista iyo Bare Sare oo Cilmi Baadhiseed eek a tirsan PRIO. Nasra Jaamac waxay gacan-yare climb-baadhiseed ka tahay mashruuca Tiro-badnaanta Wada-xisaabtanka. Waxan u mahadnaqaynaa shirkadda Great Solutions Consulting Firm kaalinta ay qaadatay tarmadda siyaasaddan kooban.

MASHRUUCA

Siyaasadani koobani waxay qayb katahay mashruuca 'dhinacyada Islaxisaabtanka Somaliland, waxa maal galiyey Mott Mack Donal/DFID. Daraasadan halka sano socoty waxa ay diiradda saaraysay cadaaladda danbiilayaasha, cashuurta iyo daryeelka caafimaadka waxaana fuliyay PRIO oo kaashatay cilmibaadhayaal reer Somaliland ah. Xog intaa kabadan ka eeg: www.prio.org/accountability

PRIO

The Peace Research Institute Oslo (PRIO) waa machad cilmibaadhista nabadda ah oo aan faa'iido doon ahayn (waxa la aasaasay 1959) ujeedadiisa ugu waynina waa inuu ku sameeyo cilmibaadhish xaaladaha xidhiidhka nabadgalyo ee ka dhaxeeya dawladaha, kooxaha iyo dadka. Machadku waa mid madaxbanaan, caalami ah waxaanu baadhitaan ku sameeyaa mawduucyo kala duwan, waxa aanu sahamiyaa arimaha laxidhaadha dhinacyada kala duwan ee nabadda iyo khilaafka.